

Wargelin ku saabsan Cudurka Coronavirus loo yaqaano (SARS-CoV-2)

- Cudurkaan Cusub ee loo yaqaano Coronavirus waxaa uu sababaa Caabuq ama Xanuun, Xanuunkaas oo lagu garto, sida Qufac, Diif, Dhuunta oo cuncunta, Qandho iyo Mar Marka Qaar Shuban ayaa lagu arkaa Qofka Cudurkaas ku dhaca.
- Cudurkaas marka uu Qofka Maanta qaado, waxaa uu soo baxaa 14 Maalmood ka dib.
- Laakiin Xanuunkaan Dadka Badankooda Wax Dhib ah oo Wayn ma u keeno (Ilaa iyo 80% Boqolkiiba Dadka Cudurkaan qaada Waxba maka dareemaan), xitaa Caruurta Cudurkaan Halis ay u dhiman karaan ma ahan. Dadka Qaar ayaa waxaa uu Cudurkaan u keenaa Xanuun Xagga Neefsashada ah, oo Sanbabada ayuu Waxyeelo u gaysan karaa. Ilaa iyo hadda waxaa la og yahay Dadka Cudurkaan u dhintay in ay ahaayeen Dad Da' ah ama horay Xanuuno kale qabay. Cudurkaan waa Mid Dadka ku cusub, oo Wax Talaal ah weli looma helin. Wax Daawo ah weli looma helin.

Cudurkaan Corona Virus loo yaqaano sidee baa loo qaadaa?

- Coronavirus waa Cudur laysku daaran karo. Waana Cudur ku faafa Marka uu Qof Cudurka qaba kugu qufaco ama hindhiso, oo markaas Dhibcaha ka soo booda Hindhisada iyo Qufaca aad markaas si toos ah u neefsatid, ama inta aad Meel Dhibcahaas ku halaysan taabatid, oo aad sidaas Afkaaga ama Indhahaaga Dhibcahaas ku halaysid ayaad Cudurkaas ku qaadi kartaa.
- Dadka 14kii Maalmood ee la soo dhaafay tagay Waqooyiga Talyaaniga ama Iraan baa waxaa ay ka mid yihiin Dadka loo maleeyo in ay Cudurkaan la kulmi karaan.

Sidee baa looga hortagi karaa faafida Cudurkaan Coronavirus loo yaqaano?

- Marka aad hindhiyasid ama aad qufacaysid, isku day in aad ka fogaatid Dadka ku ag taagan, ama isku day in aad Qufaca ama Hindhisada la jeesato. Marka ay Hindhiso ku qabato, ku hindhis Xusulkaaga ama Maro Sanka saar, markaas ka dib Marada Gudaafadda ku tuur.
- Gacmahaada ka fogay Wejigaaga, oo Afka iyo Idhahaaga ama Sankaaga ha taataabanin.
- Marka aad Dadka salaamaysid, isku day in aadan Dadka gacan qaadin, Mar Walbana Gacmahaaga iska dhaq, oo waxaad Gacmaha dhaqadaa ilaa iyo 20 Seken, Biyaha iyo Saabuun ku nadiifi.
- Sidoo kale Dadka Cusub ee hadda Waddanka soo gala waxaa ay Dhakhaatiirta ka baarayaa Cudurkaan Coronavirus loo yaqaano. Sidaa darteed Fadlan waxaan kaa codsanaynaa in aad Dhakhaatiirta u sheegto 14kii Maalmood ee la soo dhaaftay Wadamadii aad soo martay.

Maxaa la sameeyaa haddii aad is dhahdo Cudurka ayaa kugu dhacay?

- Haddii aad isku aragto Calaamadaha lagu garto Cudurkaan sida Qufac Diif Dhuunta oo ku cuncunta iyo Qandho, Fadlan waxaa lagaa doonayaa in aad Dhakhaatiirta Xaaladdaada la socodsiiiso:

Dhakhtarka Neumünster:waxaa uu furan yahay 8:00-12:00 Saac iyo 13:00-18:00 Saac Gurga 3

Dhakhtarka Boostedt:waxaa uu furan yahay 8:00-12:00 Saac iyo 13:00-16:00 Saac Guriga F1A

Dhakhtarka Rendsburg:waxaa uu furan yahay 8:00-12:00 Saac iyo 13:00-16:00 Saac Guriga 27

Haddii uu Xafiiska Dhakhtarka xiran yahay Fadlan Maalinta ku xigta soo laabo. Uma baahnid in aad Habeenkaas Cisbitaalka aado. Uma baanid in aad Gargaarka Deg-degga ah wacdid.

- Haddii uu yimaad Shaki ah in uu Cudurkaas kugu dhacay waxaa lagaa doonayaa Fadlan in aad ku ekaato Qolka lagu siiyay oo Xerada ha iska dhex marin ilaa lagaaga sheegaayo Waxa aad samayn lahayd. Fadlan sidaas yeel. Wax Kasta oo aad u baahan tahay Qolkaaga ayaa laguugu keenayaa.

Is deji, ha cabsanin. Wax Kasta oo Su'aal ah oo aad Cudurkaan ka qabto waxaad waydiisa Xafiiska Dhakhaatiirta ee Laanqeerta Cas.